

LIFAAQA H
ORAAHDA SIYAASADDA AQOONTA INGIRIISIGA KOOBAN
LIMITRD ENGLISH PROFICIENCY POLICY STATEMENT

Mayo Clinic Health System waxay baltan qaaday in ay fursado siman ka bixiso dhamaan barnaamijyada, adeegyada iyo hawlaha la siiyo shakhslyaadka aqoontooda ingiriisiga kooban tahay (LEP). Barnaamijka la siiyo dadka LEP wuxuu ku jraa Cutubka VI ee Sharciga Xuquuqda Madaniga Civil Rights Act ee 1964 kaasoo mamnuuca takoorka ku saleysan asal qaran; badbaadirtaan waxaa kaloo taageera Ammarka Fullinta (Executive Order) 13166. Adeegyada waxaa ka mid ah in tadamada qoran iyo tarjamada atka, oo lacag la'aan, la siiyo dadka LEP si too hubiyo in si macno leh, sax ah, iyo si siman loa heto barnaamijyada, manaafacaadka, iyo hawlaha.

Waa siyaasadda Mayo Clinic Health System in aan la dhiiri gelinin iyo in aan xubnaha qoyska ama asxaabta loo isticmaalin sida turjubaano maxaa yeelay tan waxay jebin kartaa asturnaanta qofka iyo waxay kashifi kartaa macluumaad xasaasi ah oo asturan. Waa siyaasadeena in aan u sheegno dhamaan macaamiisha LEP xaqa ay u leeyahiin in la siiyo kaalmada luqadda oo lacag la'aan ah/adeegyada turjubaanka iyo in aan kharash lagu sao dallicin macaamiilka LEP. Macaamiisha LEP ee diida adeegyada noocaas iyo codsada in ay isticmaalaan xubi'l ka tirsan qoyska ama saaxiib waxaa laga codsan doonaa in ay saxiixaan Sii Deyn (Release) aqoonsata in dhaqankaan dhallin karo jebinta asturnaanta iyo in isaga/iyada aysan wakaaladda u qabsan doonin mas'uuliyadda la xariirta tagamo aan sax ahayn ama gaarsiin khalad ah.

Ururkaan wuxuu mamnuucay in caruurta yaryar (18 sanno ama ka yar) loa isticmaalo sida turjubaan, mana u ogolaan doonto cauurta yaryar in ay turjumaan, xaalad kasta oo lagu jiro.


Wakaaladaan waxay sannad kasta la socotaa isbaddalada sasaanka tirada iyo dadka, si loa hubiyo in la ogaado isbaddalada tirada iyo baahida la qabo luqadda meelaha aan u adeegno.

Ohamaan inta qaadata ee qandaraas la gasha wakaaladaan waxaa laga rabaa in ay u hoggaansamaan sharuudaha siyaasadaha LEP.

Si noolagu kaalmeeyo u hoggaansamida dhamaan sharciyada, xeerka iyo tilmaanta u dagsan aqoonta Ingiriisiga kooban, waxaan u magacaabay

Mary Bygd **715-233-3644**

in ay ahaato Iskuduwaha Aqoonta fngiriisiga Kooban. Macaamiisha LEP waxaa lagu dhiiri gelinaa in ay codsadaan kaalmada luqadda ama in ay isaga/iyada kala hadlaan dhibaatooyinka ay u arkaan takoor. Waa la heli karaa macluumaadka ku saabsan habka xallinta ashtakada takoorka kaddib marka la codsado.

	3/23/15
---	---------

SAXIIXA- Agaasimaha Fullinta ama Sarkaalka Fullinta Sare

Taariikhda la Saxiixay